



## Macluumaaad muhiim ah oo ku saabsan jadeecada

*Macluumaaadka waxaa bixiyay waaxda caafimaadka ee degaanka Multnomah, Clackamas iyo Washington.*

Dillaaca jadeecada ee hadda ka jira Degaanka Clark, Washington, ayaa keenaya su'aalo ku saabsan waxa ay waalidiintii tahay in ay ogaadaan sida ay carruurtooda uga dhigayaan kuwo badbaado leh, iyo waxa dugsigoodu samayn doono haddii kiis jadeeco ah la xaqijiyo in uu ka jiro goobtooda.

Halkan waxaa ku qoran macluumaaad muhiim ah oo ay tahay in maskaxda lagu hayo:

Jadeecadu waa mid aadka la isku qaadsiyo. Haddii kiis la xaqijiyo in uu ka jiro dugsiga ama xarunta xannaanada carruurta, waaxda caafimaadku aaya dib u eegi doonta dhammaan diiwaannada tallaalka ee shaqaalahi iyo dugsiga si loo go'aamiyo halista sii faafidda.

Ilaalinta carruurta ku jirta dugsiga/xannaanada carruurta waa mid mudnaan leh, laakiin jadeecadu waa cudur halis ah. **Haddii qof aan tallaalnayn ay soo gaarto jadeeco, looma oggolaan doono in uu aado dugsi ama xannaanada carruurta inta lagu jiro wakhtiga ay jiran karaan, oo sida caadiga ah 21 maalmood ka dib soo gaarista.** Tani waa la kordhin karaa haddii ay jiraan kiisas dheeraad oo jadeeco ah.

Dadka laga reebay dugsiga ama xannaanada caruuerta ka dib soo gaarista jadeecada waxaa laga codsadaa in ay guriga joogaan si looga ilaaliyo in gaarsiyyaan dadka kale ee bulshada ka tirsan.

**Hadda waa waqtii wanaagsan oo loogu talagalay qoysaska, macallimiinta iyo maamulayaashu dugsigu in ay dib u eegaan diiwaannadooda tallaalka isla markaana tallaaladooda uga dhigaan kuwo cusub.**

Qof kasta oo qaba su'aalo ku saabsan infekshanka jadeecada ama tallaalka jadeecada waa in uu wacaa daryeel bixiyihiisa aasaasiga ama waaxda caafimaadka ee degaankiisa:

- Caafimaadka Dadweynaha ee Degaanka Multnomah, 503-988-3406
- Caafimaadka Dadweynaha ee Degaanka Washington, 503-846-3594
- Caafimaadka Dadweynaha ee Degaanka Clackamas, 503-644-8411

Wixii macluumaaad ah ee dheeraad ah, booqo [website-ka](#) Waaxda Caafimaadka Degaanka Multnomah.

Si Daacadnimo leh,  
Jennifer Vines, MD, MPH  
Ku xigeenka Sarkaal Caafimaadka u Qaabilsan  
Waaxda Caafimaadka Degaanka Multnomah